



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Abril 16, 2021

Ku socota: Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Fiidiyowga Impact Oregon

Janaayo 2021, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS) ayaa bilaabay [Impact Oregon](#), oo ah website cusub oo loogu talagalay si uu shaqo raadiyayaasha ugu xiro xirfadaha shaqo ee dhanka qaybta naafanimada koriinka.

Tan iyo markaas, waxaanu bilawnay [qalabka dhanka internet-ka](#) iyo xayeysiinta warbaahinta bulshada oo lacagteeda la bixiyay oo loogu talagalay gaarista dadka reer Oregon oo ku saabsan ilahan cusub.

Waxaan sidoo kale sii deynay fiidiyow cusub oo xayeysiis ah oo muujinaya waxa Impact Oregon ay qabato: https://youtu.be/A_oamNyv38s

Waxaan u baahanahay caawimaadaada si loo sii gudbiyo hadalka! ODDS waxay codsanaysaa in hay'adaha maamulka kiiska iyo daneenayaashu [ay fiidiyowga kula wadaagaan](#) nidaamyadiina warbaahinta bulshada iyo website-yadiina. Isticmaala [qalabka dhanka internet-ka](#) si aad u daabacdaan warqado xayeysiis ah markasta oo loo baahdo. Haddii hay'adiinu ay leedahay website, fadlan ku xira Impact Oregon idinka oo kaga soo xiraya website-kiina: <https://impactoregon.careers>

Waxaanu dhammaanteen ka wada shaqeynaynaa wanaajinta awooda daryeel bixiyaha iyo in dad xirfad leh loo keeno shaqaalaheena. Haddii aanu sii gudbin karno hadalka ku saabsan [Impact Oregon](#) in uu yahay ilo

gobolka oo dhan ka jira, dad badan oo reer Oregon ah ayaa wax ka ogaan doona fursadaha laga heli karo ee dhanka naafanimada koriinka.

Waad ku mahadsan tihiin taageeradiina iyo dadaaladiina.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.